

## QADDARADA DHEEFTA CUNTADA

Dheefaha bilaha waxaa lagu saleeyaa inta qof ee gurigaaga ku nool, dakhligaaga, iyo kharashkaaga nolasha.

Dheefaha ugu badan waa:

Dadka Qoyska	Dheefta Ugu Badan*
1	\$291
2	\$535
3	\$766
4	\$973
5	\$1,155

\*Qaddarada la cusboonaysiiyo Oktoobar kasta

## LOOMA BAAHNA IN AAD TAHAY MUWAADIN MAREYKAN AH SI AAD U HESHO DHEEFAHA CUNTADA

Muhaajiriinta buuxiya sharciyada barnaamijka gaarka ah ee waafaqsan Barnaamijka Nafaqada Dheeriga ah ee Federaalka ayaa xaq-u-yeelan kara Dheefaha Cuntada. **Haddii aad hesho dheefaha cuntada, laguuma tixgelin doonno in aad tahay qof ku tiirsan dowladda.**

Muhaajiriinta sharci-darada ah, dalxiisayaasha iyo dadka kale ee aan muhaajiriinta ahayn xaq uma lahan dheefaha cuntada.



## SIDEEN KU CODSANAYAA?

Waxaad ka codsan kartaa telefoonkan **877-501-2233** ama Xafiiska Adeegyada Bulshada ee ugu dhow. Looma baahna in aad buuxiso codsi ka hor inta aanan lagula yeellan wareysigaaga xaq-u-yeelashada.



Waxaad sidoo kale 24/7 ka codsan kartaa barta internet-ka [washingtonconnection.org](http://washingtonconnection.org) ama boostada. La-soco si aad ugu sameyso wareysigaaga xaq-u-yeelashada **877-501-2233** ama Xafiiska Adeegyada Bulshada ee ugu dhow.

Fakis: 888-338-7410

Cinwaanka boostada:

DSHS Customer Service Contact Center

P.O. Box 11699

Tacoma, WA 98411-6699



*Transforming lives*

DSHS 22-1301 SM (Rev. 4/24) Somali

Hay'adan waxay bixisaa fursad loo siman yahay.

# Ikhtiyaarada Cuntada Caafimaadqabka leh ee loogu talagalay hab-nololeedka caafimaadka leh **Cuntada Aasaasiga ah**



**SNAP**  
Barnaamijka  
Gargaarka  
Nafaqada  
Dheeriga ah

## Waa maxay Cuntada Aasaasiga ah?

Cuntada Aasaasiga ah, sidoo kale loo yaqaanno Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeriga ah ama SNAP, wuxuu dadka ku caawiyaa in ay iibsadaan raashiinka.

Qoysaska xaqa u leh waxay helaan kaarka Xawilaadda Dheefaha Elektarooniga ah, ama EBT, oo ay ku jiraan dheefo bil kasta ah oo cunto looga iibsan karo dukaamada raashiinka iibiya ee ka qaybqaadanaya.



**Ma ogtahay?** In aad ku isticmaali kartid dheefaha Cuntada Aasaasiga ah ee EBT suuqyada beeraleyda. In aad sidoo kale u isticmaali kartid in aad ku iibsato dhirta ama abuurka cuntada soo saara ama la beerto.

## Cuntada Aasaasiga ah ma igu caawin kartaa tababar ama shaqo in aan helo?

- Haa! Haddii aad qaadato Cuntada Aasaasiga ah, waxaad si iskaaga wax-u-qabso ah ugu qaybqaadan kartaa Barnaamijka Tababbarka iyo Shaqada ee Cuntada Aasaasiga ah.
- Barnaamijka BFET wuxuu bixiyaa adeegyada shaqo-raadin, tababarka shaqo raadinta, adeegyo waxbarasho, tababar xirfadeed, iyo fursado kale oo shaqo oo loogu talagalay dadka qaata Cuntada Aasaasiga ah.

Ururro faro badan ayaa bixiya caawimaadda gaadiidka, daryeelka carruurta ama kheyraad kale oo kugu caawin kara in aad ka shaqeyso yoolalkaaga shaqo. Adeegyada waxaa la bixiyaa iyadoo loo marayo ururro ku saleysan bulshada waxayna bixiyaan xirfado iyo qaybo shaqo badan oo kala duwan.

**Haddii aad rabto macluumaad badan oo ku saabsan adeegyada BFET, booqo mareegtada:**

[dshs.wa.gov/BFET](https://dshs.wa.gov/BFET)

## Maxay tahay waxa aan ka oggaanayo dheefaha Cuntada Aasaasiga ah?

Dadka Qoyska	Xadka Dakhliga Bilaha ah*
1	\$2,510
2	\$3,407
3	\$4,303
4	\$5,200
5	\$6,097

\*Qaddarada waxaa la cusboonaysiiyaa Abriil kasta

Dadka intooda badan ma lahan xaddidaadaha dakhliga saafiga ah ama khayraad.

- Marka aad hesho Cuntada Aasaasiga ah, waxaad xaq-u-yeelan kartaa barnaamijyo kale:
  - Barnaamijka raashiinka iskuulka ee qiimaha-jaban ama bilaashka ah.
  - Barnaamijka nafaqada gaarka ah ee loogu talagalay Haweenka, Dhallaanka, iyo Carruurta ama WIC.